

# GUUDMARKA QABYO-QORAALKA QORSHAHACUSUB EE DEEGAANKA

Dhawrka bilood ee soo socda waxa jiri doona fursado badan oo lagaga qayb qaadan karo qaabeynta Ealing iyo Qorshahayaga Cusub ee Maxaliga ah. Si aad u hesho wixii warbixino cusub ah kaliya iska diiwaangeli websaydkeena

[www.Ealing.gov.uk](http://www.Ealing.gov.uk)

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Qaabeynta Ealing booqo  
[www.ealing.gov.uk/shapingealing](http://www.ealing.gov.uk/shapingealing)

# WAXA DUKUMENTIGA UU KA KOOBAN YAHAY



<b>Sida loo bixiyo jawaab-celinta</b>	03
<b>wada-tashi</b>	
<b>Waa maxay Qorshe Deegaan?</b>	04
<b>Aragtideena/Hadafkeena</b>	05

## **Qorshayaasha Magaalooinka:**

Qorshaha Magaalada Acton	08
Qorshaha Magaalada Ealing	10
Qorshaha Magaaladam Greenford	12
Qorshaha Magaalada Hanwell	14
Qorshaha Magaalada Northolt	16
Qorshaha Magaalada Perivale	18
Qorshaha Magaalada Southall	20

Qaado/sameey sahankeena gaaban!	23
---------------------------------	----





## Waa maxay dukumeentigani?

Kani waa dukumeenti guudmar u ah Qorshaha cusub ee Maxaliga ee qabyada ah. Fadlan ogow dukumeentigan kuma jiraan siyaasadaha hagaya horumarka.

Waxaad dukumeentiga oo buuxa oo leh siyaasadaha ka heli kartaa halkan.

## Sida loo bixiyo jawaab celinta wadatashiga

Waxaan qof kasta oo xiisaynaya mustaqbalka Ealing ku martiqadeynaa inuu bixiyo faallooyin ku aadan Qorshaha Maxaliga ah ugu dambayn 25ka Janaayo 2023.

Dukumeentiga Qorshaha Maxaliga ah ee Qabyada ah waxaanu ku dhex darnay su'aalaha hoos yimaada siyaasadaha kuwaas oo codsanaya jawaab-celinada ku aadan soo jeedintayada. Su'aalaha wada tashigu waa kuwo isdhagal leh, taas oo kuu ogolaanaysa inaad onlayn ahaan kaga jawaabto adigoo gujinaya linkiga su'aal kasta.

Waxaa jira habab dheeraad ah oo lagu bixiyo jawaab celinada wada tashiga iyada oo la isticmaalayo iimayl, boosto iyo munaasabadaha qof ahaan looga soo qeybgalo.

Waxaad websaydka Golaha ka heli kartaa dhammaan macluumaadka la xiriira wada-tashigan, oo ay ka mid yihiin dokumentiga Qorshaha Maxaliga ah ee Qabyada ah, iyo dokumentiyada taageeraya.

Nuqullada adag/warqadaha ah ee Qorshaha Deegaanka ee qabyada ah ayaa sidoo kale laga heli karaa Xafiiska Golaha Ealing ee 14 Uxbridge Rd (W5 2HL) iyo dhamaan maktabadaha degmada.

## Waa maxay Qorshaha Maxaliga ah?

Qorshayaasha maxaliga ahi waxay qaabeeyaan oo ay hagaan horumarka mustaqbalka ee gudaha xaduudaha Ealing. Qorshaha cusub ee Ealing wuxuu u qaybsan yahay afar qaybood oo waaweyn:

- Istaraatijiijiyad goobeed oo dejinaya aragtii guud oo ku aadan magaalooyinka iyo sida istaraatijiijiyadda loo hirgelin doono.
- Isku darka todobada qorshe ee magaaloojin kuwaas oo sharxaya sida looga hirgelin doono xaafado kala duwan, oo ay ku jiraan 118 goobood oo horumarineed halkaas oo ay ka jirto suurtagalnimoo ah in la hormariyo.
- Siyaasadaha maaraynta horumarinta ee gacan ka geysan doona hagida go'aaminta codsiyada qorshaynta ha noqoto kabitaanka siyaasadaha Qorshaha London ee hadda jira ama dejinta siyaasad cusub oo maxalli ah.
- Khariidad siyaasadeed oo muujinaysa siyaasad kasta oo loogu talagalay goob gaar ah oo u samaysan qaab khariidadeed.

Qorshahan maxaliga ahi waa inuu ku shaqeeyaa xaaladaha guud ee Qorshaha London kaas oo dejinaya qaab-dhismeedka sida London loo hormarin doono mustaqbalka waana qayb ka mid ah Qorshaha Horumarinta Ealing.



**Sawir:** Muuqaalka hawada ee Ealing



## Aragtideena/Hadafkeena

Aragtida/hadafka 15-sano ah ee Ealing wuxuu hiigsanayaa in kor loo qaaddo sifooinka gaarka ah iyo aqoonsiga dhaqameed ee mid kasta oo ka mid ah todobada magaalo ee Ealing taas oo ka tarjumaysa saddexda ujeedooyin istaratijadeed ee udub dhexaadka u ah Qorshaha Golaha:



**Sawir:** Ahmiyada Safarka  
Firfircoon ee Degmada.



### Abuuritaanka shaqooyin wanaagsan iyo kobac:

Ealing waxay noqon doontaa mishiinka dhqaalaha cusub ee Galbeedka London. Wuxaan maareyn doonaa kobaca si aan u bixino marin u hel cadaalad iyo sinnaan ku dheexan ee shaqooyinka bixiya dakhli nololeed wanaagsan. Kobaca ayaa gacan ka geysan doona helitaanka guryo qiimahooda la awoodi karo iyo goobo shaqo oo la awoodi karo. Wuxaan rabnaa kobaca ka dhaca Ealing inuu noqdo mid loo wada dhan yahay kaas oo ay dadkuna wax ku biirin karaan waxna ka faa'iidi karaan kobaca. Ealing way kobci doontaa waxayna badin doontaa goobaheeda ganacsi, waxayna sii xoojin doontaa doorka qaybaha warshadaha, warshadaha hal-abuurka iyo dhaqaalaha wakhtiga habeenkii. Wuxaan sidoo kale:

- Horumarinta ku jiheyн doonaa goobaha waara si loo xaqijiyo isticmaalka hufan ee dhulka.
- Hirgelin doonaa Yoolalka Guryeynta ee Qorshaha London (iyadoo 50% lagu jiheyн doono guryaha qiimahooda la awoodi karo).
- Kor u qaadi doonaa nashqadayn iyo adeegyo wanaagsan.
- Qaadi doonaa hab istiraatijiyadeed oo lagu ilaalinayo laguna kobcinayo dhaxalka.
- Aqoonsan doonaa meelaha ku habboon dhismayaasha dhaadheer iyo isbeddelada kordhinaya tayada isla markaana dhammaystiraya dabciga iyo hammiga meel-samaynta ee Ealing.
- Samayn doonaa hirgelinta kaabayaasha lagama maarmaanka u ah jirka, bulshada iyo cagaarka.
- Joogteyn doonaa jiritaanka iyo firfircoonda xarumaheena magaalada.
- Bixin doonaa guryo cusub oo runtii isku dhafan, bulshooyinkana u wada dhan yihiin.
- Taageeri doonaa dhaqanka iyo hal-abuurka warshadaha.
- Abuuri doonaa qaab-dhismeed cad oo loogu talagalay wada xaajoodyada mustaqbalka ee ku saabsan waajibaadyada qorshaynta, oo ay ku jirto Cashuuraha Kaabayaasha Cusub ee Bulshada (CIL).
- Taageeri doonaa dhaqaale loo dhan yahay oo sii haynaya hantida guud iyo dhismayaasha si ay uga faa'iidaystaan dadka deegaanka oo ay ku jiraan Hay'adaha Dhulka Bulshada





### **Wax ka qabashada dhibaatada cimilada:**

Ealing waxay ku dadaali doontaa inay faa'iidooyinka kobaca cusub si siman ugu faafiso dhammaan xaafadaha degmada, Ealing waxay ku dadaali doontaa inay abuurto oo ay kor u qaaddo 20-daqiyo ah ee xaafadaha guud ee degmada, halkas oo inta badan baahiyaha maalinlaha ah lagu dabooli karo iyadoo la isticmaalayo socod gaaban ama baaskiil. Ealing waxay noqon doontaa nadiif, cagaar, iyo magaalo waarta. Waxaan sidoo kale:

- Ka faa'iidayn doonaa dhulka iyo maalgelinta gaadiid waara oo dheeraad ah.
- Maareynta qashinka iyo kor u qaadida wax-ku-oolnimada.
- Kor u qaadista waxtarka tamarta iyo maalgashiga teknoolajiyada cusub.
- Dhisidda adkeysi iyo la qabsiga jawiga isbeddelaya.
- Ilaalinta, tayeynta iyo balaarinta shabakada kaabayaasha cagaaran.
- Ilaalinta iyo tayeynta tas-hiilaadka bulshada si ay gacan uga gaystaan horumarinta bulshooyinka wada-jirka ah iyo ka qayb qaadashada is-dhexgalka, wadajirka iyo hanka bulshada.

— Bixinta kaabayaal cusub oo kuwo la hormariyey oo loogu talagalay bulshada.

— Ilaalinta, wanaajinta iyo fududaynta kaabayaasha bulshada ee hadda jira si loo daboolo baahiyaha loona xaqijiyo bixinta kaabashaayasha cusub ee lagama maarmaanka u aha bulshada sida xarumaha bulshada.



**DIB U SOO NOOLEYNTA IYO  
HORUMARKA CUSUB WAXA LA  
AQBALI DOONA OO KALIYA HADDII  
NATIIJOOVINKA CAAFIMAADKA IYO  
BADQABKA MUDNAANTA LA SIIYO.**



**Sawir:** Waddada Uxbridge,  
Ealing.





### La dagaallanka sinnaan la'aanta:

Caruurta iyo dhallinyaradu waa inay si cadaalad ah ku bilowaan nolosha, qof kastaana waa inuu ku raaxaysto nolal cimri dheer oo caafimaad leh oo ka madaxbanaan dembi iyo sinnaan la'aan. Wuxaan sidoo kale:

- Taageeri doonaa nolol caafimaad leh iyadoo loo marayo tayada hawada oo la wanaajijo iyo ka shaqeynta sidi loo dhimi lahaa saamaynta isbeddelka cimilada.
- Hirgelin doonaa 20-daqiijo ah ee xaafadaha si loo xaqiijiyo marin u helka wanaagsan ee fudud ee daboolitaanka baahiyaha maalinlaha ah.
- U heellanaan doonaa heerarka naqshadaynta sareeya ee horumarinta.
- Joogteyn doonaa sahay ku filan iyo marin u helka la wanaajiyey ee tashiiлаадка madadaalada iyo isboortiska.
- Hirgelinta Qiimaynta Saamaynta Caafimaadka.
- Buuxin doonaa baahiyaha kaabayaasha caafimaadka iyo baahiyaha guriyeynta ee takhasuska leh.
- Wanaajin doonaa marin u helka meelaha cagaarka ah iyo meelaha bannaan.
- La shaqeyn doonaa NHS iyo adeeg bixiyayaasha kale si loo xaqiijiyo helitaanka daryeel caafimaad iyo adeegyo kale oo wanaagsan.
- Buuxin doonaa baahiyaha hoyga ee Gypsy, Roma iyo Traveller, oo ay ku jirto samaynta goob gaadiid oo gaar ah.



**Sawir:** Taageerida dadka deegaanka ah ee nugul.



## Qorshaha Magaalada Acton

Acton waa mid ka mid ah magaalooyinka kala duwan ee degmada; waxa ku yaala xarumo magaaleed oo badan oo kala duwan iyo tiro badan oo goobo warshadeed ah. Waa albaabka koonfureed ee aagga dib u cusboonaysiinta ugu weyn ee Boqortooyada Midowday ee Old Oak iyo Park Royal taas oo lagu soo dari doono taarminaalada cusub ee Xawaarahaa Sare 2 marka la gaaro 2030. Waxay sidoo kale ka faa'iidaynsayaa u dhawaanshaheeda A40 iyo Uxbridge Road. Acton waxa ay dadka deegaanka u samaysay natijjooyin dhaqan-dhaqaale oo isku dhaf ah, iyada oo leh goobo ay ka jiraan dhibaato qoto dheer ee ku dhegan meelaha hodanka ah.

Acton meel fiican aya ku taalaa si ay uga faa'iidaynsato isku xirkeeda ugu wanagsan (todoba tareen iyo boosteejooyin). Waxaa jira maalgashi la qorsheeyay in lagu sameeyo kaabayaasha si loo helo heerar horumarineed oo la taaban karo, gaar ahaan gudaha xarumaha magaalada iyo warshadaha goobaha ay dadka iyo fursadaha shaqada ku badan yihiin ayaa aad loo dhiiragelinaya. Waxaa sidoo kale ay hoy u tahay Zoonka Hal-Abuur Ganaci (CEZ) kaas oo ujeedadiisu tahay in lagu taageero farshaxanada iyo hal-abuurka cusub ee ganacsatada si ay u helaan goob shaqo oo qiimo jaban oo gudaha degmada ah.

### Waxa aad noogu sheegtay Sahanka Qaabeynta Ealing

Dadka maxalliga ah ee Acton waxay ka walaacsan yihiin guryaha qimahooda la awoodi karo, sida aaggoodu isu beddelayo, tayada hawada, iyo inaysan jirin goobo/waddooyin lugayn iyo baaskiil wadid loogu talagalay. Si kastaba ha ahaatee, gaadiidka dadwaynaha, isku-xidhka bulshada, iyo jardiinooyinka nadiifka ah, jardiinooyinka nabdoon iyo meelaha banaanba waxaa si aad ah u qjimeeyay dadka deegaanka.

### Aragtida/Hadafka Aton:


#### Shaqooyinka iyo Kobaca:

Fursadaha dhaqaale ayaa lagu kordhin doonaa aagga iyada oo loo marayo imaatinka khadka Elizabeth ee Xarunta Khadka Dhexe ee Acton iyo isweydaarsiga mustaqbalka ee boosteejada Old Oak Common HS2. Kobaca waxa diirada lagu saari doonaa isweydaarsiga gaadiidka ee hadda jira oo ay ku jiraan Acton Town, Khadka Weyn ee Acton, Bartamaha Acton, iyo Koonfurta Acton.

Aagga Warshadaha ee Acton (oo leh takhasusyo dhanka cuntada, wax soo saarka, jumlada, gaadiidka, iyo kaydinta ah) waxaa lagu taageeri doonaa oo lagu horumarin doonaa iyada oo loo marayo horumarinta iyo xoojinta goobaha warshadaha ku habboon. Waxaan sidoo kale soo jeedinaynaa in la horumariyo takhasusyada ganacsiga Acton iyo waxqabadka aqoonta degdega ah. Waxaan ku taageeri doonaa bixinta goobo shaqo oo la awoodi karo, waxaana ku taageeri doonaa dadka deegaanka xirfado, shaqo iyo fursado waxbarasho oo qeybaas ah.



**Sawir:** Dadka u shaqeeynaya si wada jir ah.



Naqshad tayo sare leh oo waqtigeeda ku habboon oo wax ku ool ah ayaa lagu gaari doonaa iyadoo si iskaashi leh loola shaqeynayo Shirkadda Hormarinta Old Oak iyo Park Royal (OPDC) iyo daneyaasha kale ee muhiimka ah, sare u qaadista fursadaha ka imaanaya horumar la taaban karo oo ku xeeran boostejjada North Acton iyo iyadoo si dhow loola shaqeynayo ganacsiyada, milkiiliyaasha dhulka, iyo horumarinta.

Aqoonsiga Acton waa la hayn doonaa waana la xoojin doonaa ay ku jirto ilaalinta iyo hagaajinta xudunta taariikhiga ah Acton Town Center iyada oo loo marayo tillabooyin ay ka mid yihiin abuurista Aagga Dhaxalka Action.

Guryo si dhab ah qimahooda loo awoodi karo ayaa loo dhisi doonaa si wax looga qabto xaalad-xumada, gaar ahaan ka jirta Acton Central, South Acton, iyo East Acton.

#### **Xarumaha magaalada:**

Xarunta Magaalada Acton iyo Xarunta Xaafada East Acton waxa lagu horumarin doonaa isticmaalka hormarinta cusub ee la isku daray, iyadoo wax laga qaban doono heerka bannaanshaha ee qeybaha tafaariikhda iyadoo loo marayo isticmaal marmar ah iyo kuwo soo boodo ah, oo Magaalada Action ayaa la hagaajin doonaa oo loo ilaalin doonaa sidii xarun taariikh ah ahaan.

Xarun xaafadeed cusub oo ku taal Aagga Khadka Weyn ee Acton ayaa la abuuri doonaa, guryo cusub, goobo shaqo oo qimahooda la awoodi karo, goobaha dadweynaha, iyo hagaajin lagu samayn doono meelaha cagaaran ee Friary Park ayaa la bixin doonaa.

Dib u soo kabashada deegaanka ee South Acton way sii socon doontaa iyadoo la bixinayo ilaalin iyo xoojinta goobaha warshadaha ku haboon.

Horumarin ayaa lagu samayn doonaa xarunta xaafadda East Acton iyada oo loo marayo horumarinta isticmaalka isku dhafan iyo dhul dadweyne oo la hagaajiyay.

Xaafado 20-daqiiqo ah ayaa laga hirgalin doonaa Acton halkas oo dadka deegaanka ah ay ku dabooli karaan baahiyahooda maalinlaha ah meel 20-daqiiqo oo socod ah u jirta guryahooda. Wuxaana ku jira tas-hiilaadka wax iibsiga, nashaadaadka firaaqada, helitaanka dugsiyada, adeegyada caafimaadka deegaanka sida xarumaha GP-ga iyo goobaha shaqada ee ugu flican.

#### **Gaadiidka:**

Waxaa la hagaajin doonaa gaadiidka sida;

Wadooyin baaskiileed oo badbaado leh, nadiif ah oo cagaaran, jihad, iyo isku xiryo ka dhexeeya jardiinooyinka iyo meelaha cagaaran.

Abuuritaanka marin duurjoogta ah oo lagu sameeynayo dhinacyada dhulka aan la isticmaalin ee wadada tareenka ee Gaadiidka London iyo Dhulka Tareenka Qaranka, iyo cagaarka hareeraha A40 iyo Uxbridge Road ah, oo leh qaabab waddo oo la fududeeyay iyo laami badan oo isgoysyo la hagaajiyay leh.

#### **Caafimaadka & Kaabayaasha:**

Caafimaadka iyo kaabayaasha ayaa la horumarin doonaa oo ay ku jiraan bannaannada cagaaran iyo meelaha bannaan, meelaha ay carruurtu ku ciyaaraan, xaaladaha nololeed ee waddooyinka mashquulka ah sida A40 iyo Uxbridge Road, iyo iyadoo wax laga qabanayo awoodda GP-ga.



**Sawir:** Suuqa Acton, King Street.

**QAADO/SAMEEY  
SAHANKEENA**

*Giji halkaan ama iskaan ka  
qaad koodhka QR si aad noola  
wadaagto aragtidaada*





Sawir: Xarunta Wax libsiga ee  
Ealing Broadway.

**23%**  
**SHACABKA**  
**XAAFADDA**  
**WAXAY KA SOO**  
**JEEDAAN EALING.**

## Qorshaha Magaalada Ealing

Ealing waxay hoy u tahay xarunta kaliya ee Magaalo Weynta, waxayna u shaqeysaa sidii wadne ganacsii oo leh dukaanno, xafiisyo, iyo hawlo bulsho oo soo jiidanaya dad ka kala yimid daafaha degmada iyo meelo ka baxsan. Ealing waxa ku hareeraysan dhawr xaafadood oo kala duwan oo taariikhi ah iyo afar iyo tobant goobood oo goobo dhowrsan ah. Waxay leedahay uruurinta ugu saraysa ee aqoonta shaqada degdega ah ee degmada, iyada oo ku dhawaad 4,500 shaqooyin ah ka jiraan adeegyada dhaqaalaha iyo xirfadaha ee marinada Wadada Uxbridge iyo xarunta magaalada.

Sanadiihii la soo dhaafay kobaca tirada dadka deegaanka ayaa hakad galay waxaana hoos u dhacay shaqooyinka mushaharka sare bixiya. Sidaa awgeed, Qorshahan cusub ee Maxalliga ahi waxa uu u baahan doonaa door bulsho iyo dhaqaale si Xarunta Magaalo Weynta Ealing loo cusboonaysiyo loona xoojiyo iyada oo lagu dhiirigelinayo heerar muhiim ah oo cufnaan sare u leh degaanka iyo kobaca shaqada. Qorshaha cusub ee Maxalliga wuxuu isticmaali doonaa kooxda aqoonta dhaqaalaha Ealing iyo isku xirka gaadiidka ee wadada Uxbridge iyo helitaanka khadka Elizabeth. Istimkaal xiriiriyeashan muhiimka ah ee Bartamaha London waxay faa'iido u yeelan doontaa ganacsiga cusub, kobaca degaanka iyo shaqada.

### Waxa aad noogu sheegtay Sahanka Qaabeynta Ealing:

Dadka maxalliga ah ee Ealing waxay ka walaacsan yihiin guryaha qiimahooda la awoodi karo, sida aaggoodu isu beddelayo, tayada hawada, iyo fursado shaqo oo magaaladooda ah. Si kastaba ha ahaatee, gaadiidka dadwaynaha, isku-xidhka bulshada, iyo jardiinooyinka nadiifka ah, jardiinooyinka nabdoon iyo meelaha banaanba waxaa si aad ah u qimeeyay dadka deegaanka.

### Aragtida/Hadafka Ealing

#### Shaqooyinka iyo Kobaca:

Kobaca Ealing wuxuu soo bandhigayaa fursad lagu bixiyo guryo qiimahooda la awoodi karo, xoojinta aqoonsiga dhaqaale ee Ealing Broadway si ay u noqoto goob laga helo shaqooyin mushahaar fiican leh, aqoon badana laga helo iyadoo la ilaalinayo goobaha shaqada ee qiimahooda la awoodi karo. Kobaca aayaas soo bandhigi doona fursadaha lagu kordhinayo goobaha magaaloooyinka ee cagaaran ee ku yaala hareeraha A40, North Circle Road, Uxbridge Road, New Broadway/The Mall, iyo Argyle Road.

#### Xarumaha magaalada:

Xarunta Magaalo Weynta ee Ealing waxay noqon doontaa goobta koritaanka degenaanshaha iyo shaqada ee muhiimka ah, oo ay ku jiraan bixinta xafiisyada, dukaamada, guryaha iyo samayn hormarino sida tashiilaadka daryeelka caafimaadka, meelaha bannaan ee cagaarka ah, iyo tayada hawada.



North Ealing waa la dayactiri doonaa oo waa la horumarin doonaa, oo ay ku jiraan kaabayaasha bulshada xarunta xaafada Pitshanger Lane, isticmaalka wakhtiga firaaqada iyo isticmaalka dukaanka. Goobta Istaraatijiyadda Warshada Hanger Lane Gyatory dib ayaa loo habayn doonaa waxaana laga dhigi doonaa Goob Warshadeed oo muhiim ah si loo kordhiyo tirada warshadaha iyo shaqooyinka.

South Ealing iyo Ealing Common waa la ilaalin doonaa waana lagu xoojin doonaa iyadoo hormarin lagu samayn doono kaabayaasha bulshada sida tas-hiiilaadka bulshada, dukaamaysiga iyo safarka iyo shabakadaha cagaaran.

Xaafado 20-daqiico ah ayaa laga hirgalin doonaa Ealing halkas oo dadka deegaanka ah ay ku dabooli karaan baahiyahooda maalinlaha ah meel 20-daqiico oo socod ah u jirta guryahooda. Waxaan ku jira tas-hiiilaadka wax iibsiga, nashaadaadka firaaqada, helitaanka dugsiyada, adeegyada caafimaadka deegaanka sida xarumaha GP-ga iyo goobaha shaqada ee ugu fiican.

  
**HORUMARINTU WAA  
IN AY ISKU DHAFTAA  
AWOODAHA JIRA IYO  
FURSADAH CUSUB.**

### Gaadiidka:

Waxaa la hagaajin doonaa gaadiidka sida;

Horumarinta isku xirka safarka firfircooni, gaar ahaan Drayton Green Road, Argyle Road, iyo Castlebar Road.

Maareynta kaabayaasha gawaarida iyo baaskiilada waa la maareyn doonaa si loo xaqijiyo waddo baaskiileed oo badbaado leh oo joogto ah oo dhexmarta Waddada Uxbridge ee isku xirta Hanwell iyo Acton.

Casriyeenta marinka duurjoogta ee TFL iyo tareennada Qaranka iyo hagaajinta goobaha dadweynaha iyo kaabayaasha waddooyinka ku yaala geduha iyo hareeraha Pitshanger Lane, South Ealing, iyo Northfields.



**Sawir:** Marin u helka khadka Elizabeth.



## Qorshaha Magaalada Greenford

Greenford waa aag xaafad ah oo horumartay intii lagu jiray xilligii dagaalka ku agtaala magaalo taariikhi ah oo dhanka koonfureed ka xigta iyo warshadaha dhinaca kanaalka ee woqooyiga. Magaaladu waxay ka kooban tahay xarumo maxalli oo kala duwan oo dhanka woqooyi ka xiga xarunta magaalada Greenford. Kuwaas, waxaa ka mid ah xaafadda iyo xarumo maxalli ah oo ku yaala Westway Cross, Boostejada Greenford, iyo Sudbury Hill kuwaas oo bixiya adeegyo cunto iyo dukaamo kala duwan. Greenford waxay sidoo kale ka faa'iidaysanaysaa tayada sare ee goobaha cagaarka ah sida Horsenden Hill iyo Ravenor Park, Grand Union Canal iyo River Brent. Greenford waxay ka kooban tahay dhul warshadeed oo qiimo leh. Waa, aag weyn oo shaqooyin leh iyo noocyoo kala duwan ah leh oo tignoolajiyada cusub ah, saadka, warshadaynta iyo meheradaha cuntada kuwaas oo bixiya shaqo maxalli ah isla markaana sidoo kale shaqaale u soo jiidaya Greenford. Magaaladu waxay leedahay isku xirka gaadiidka ee Bartamaha London iyo Heathrow ee adeega tareenka dhulka hoostiisa mara ee London.

Greenford waxay aragtay heerar dhexdhexas ah oo horumarineed iyo maalgashiga tobanaankii sano ee la soo dhaafay, gaar ahaan marka la barbar dhigo Southall, Ealing, iyo Acton. In kasta oo ay caqabado ka jiraan, Greenford waxaa loo aqoonsaday inay leedahay karti weyn oo ay ku dejiso heerar muhiim ah oo cusub oo horumar ah. Greenford waxay u noqon doontaa Xarunta Hal-abuurka ee maalgashiga galbeedka London taasoo gacan ka geysan doonta soo jiidashada iyo dardargelinta kobaca tirada ganacsiyada teknoolojiyadda sare leh.

### Waxa aad noogu sheegtay Sahanka

#### Qaabeynta Ealing:

Dadka deegaanka ee Greenford waxay ka walaacsan yihiin guryaha qimahooda la awoodi karo, sida aaggooda isu beddelayo, dukaamada iyo tas-hiilaadka madadaalada ee kala duwan ee ka jira aagga, tayada hawada iyo jiritaanka la'aanta fursado shaqo ee maxalli ah. Si kastaba ha ahaatee, gaadiidka dadweynaha iyo isku xirka bulshada waxaa si aad ah u qiimeeyay dadka deegaanka.

### Aragtida/Hadafka Greenford

#### Shaqooyinka iyo Kobaca:

Horumarinta isticmaalka isku-dhafan ee dhexdhexas ah ayaa lagu jihayn doonaa Meelaha isku xirka ugu wanaagsan leh, iyadoo maalgashigu wax ka qaban doono caqabadaha dhaqdhaqaqa iyo badbaadada iyada oo loo marayo helitaanka gaadiidka dadweynaha oo wanaagsan, iyo waddooyinka safarka firfircoo ee badbaado iyo soo jiidasho badan leh, cagaarka u yeelista magaaloooyinka iyo waddooyinka tallaabooyinka kor u qaadista badbaadada ayaa wanaajin doona safarka qof walba.

Bixinta goob shaqo oo ku habboon oo qiimaheeda la awoodi karo iyo kaabayaal ganaci si ay u bilaabaan, u kabciyaan una horumariyaan iyada oo la ilaalinayo lana horumarinayo goobo shaqo oo badan, sahaminta fursadaha lagu bixinayo dhul shaqo oo dheeraad ah iyo noocyoo kala duwan leh, iyo xaqijinta in goobahaas ay daboolayaan baahiyo kala duwan.



Sawir: Shaqaalaha  
Baaskiilada Brompton.

7%  
**DHAMMAAN  
SHAOOYINKA  
GREENFORD WAA  
WAX SOO SAARKA  
TEKNOOLAJIYADDA  
SAREYSA.**



### Xarumaha magaalada:

Si loo wanaajiyo isticmaalka dhulka sida tayada dukaamada, dib u dhis goobaha isticmaalka isku dhafan, wax ka qabashada guryaha banaan iyo in la ilaaliyo dhaxalka Xarunta Degmada Greenford, sida sidoo kale horumarinta goobaha madadaalada iyo goobaha bulshada ee tayada sare leh.

Xarunta xaafadda Westway Cross way sii wadi doontaa inay bixiso xulashooyin tafaariiq, cunto iyo cabitaan, oo in si hufan loo isticmaalo dhulka ayaa la sahmin doonaa. Waxaa jiri doona horumar lagu samayn doono isku xirka iyo u-gudbinta Paradise Fields, Horsenden Hill.

Xarunta xaafadda Sudbury Hill ayaa la horumarin doona iyadoo la wanaajinayo heerarka dhexdhexasadka ah ee horumarinta isticmaalka isku dhafan ee agagaarka boosteejada, cusboonaysiinta dukaamada hortooda, soo kordhinta noocyoo kala duwan oo tafaariiq ah, iyo fursadaha ganacsiga iyo madadaalada.

Xarunta deegaanka ee Greenford Station ayaa la horumarin doonaa iyadoo kor loo qaadayo heerarka dhexdhexasadka ah ee horumarinta isticmaalka isku dhafan, iyo keenista noocyada kala duwan ee tafaariiqda, madadaalada, iyo isticmaalka bulshada.

Xaafado 20-daqiijo ah ayaa laga hirgalin doonaa Greenford halkas oo dadka deegaanka ah ay ku dabooli karaan baahiyahooda maalinlahaa ah meel 20-daqiijo oo socod ah u jirta guryahooda. Wuxaan ku jira tas-hiilaadka wax iibsiga, nashaadaadka firaaqada, helitaanka dugsiyada, adeegyada caafimaadka deegaanka sida xarumaha GP-ga iyo goobaha shaqada ee ugu fiican.

### Gaadiidka:

Waxaa la hagaajin doonaa gaadiidka sida;

Wanaajinta isku xirka Greenford dhexdeeda ah, iyo qaybaha kale ee Ealing iyo xaafadaha deriska la ah iyo wixii ka baxsan iyadoo la isticmaalayo isku xirka khadka Elizabeth iyo adeegyada tareenada.

Wanaajinta waddooyinka dugsiyada, deegaanka iyo goobaha shaqada ee taga xarumaha magaalada, meelaha cagaaran, iyo isgoysyada Grand Union Canal, khadka tareenka, iyo A40.

Wanaajinta waddooyinka socodka, baaskiil wadida, iyo waddooyinka gaadiidka dadweynaha ee ag mara wadada Greenford iyo inta u dhaxaysa waqooyiga iyo koonfurta A40.

Maalgelinta kaabayaasha safarka firfircooni sida baaskiillada iyo hagaajinta gelitaanka, amniqa iyo qaabaynta tayada qaybaha aan la isticmaalin ee Grand Union Canal si ay u noqdaan waddooyin soo jiidasho leh, oo ammaan ah.

### Caafimaadka & Kaabayaasha:

Caafimaadka iyo kaabayaasha ayaa la horumarin doonaa iyadoo la maalgelinayo qeybaha madadaalada sida meelaha bannaan ee cagaaran iyo goobaha biyaha sida kanaalka Grand Union, Hagaajinta gelitaanka, raadinta iyo calaamadaynta meelahaas waxay abuureysaa fursado ay bulshooyinku isugu yimaadaan, waxayna kordhinayaan dareenka badbaadada.

Greenford waxay noqon doontaa bulsho xooggan, caafimaad qabta iyadoo yeelan doonta taashiilaad cusub, la hagaajiyay, ama tas-hiilaad daryeel caafimaad oo bedel ah, tashiilaad madadaalo, dhaqameed iyo bulsho. Tallaaboooyinka ayaa lagu dabaqi doonaa si loo sugo dayactirka mustaqbalka, dib u isticmaalka iyo badbaadada mustaqbalka fog ee hantida dhaxalka ah.

Cagaar ka dhigista magaalada waxaa lagu bixin doonaa horumarin cusub iyo qorshayaal geedo talaalis ah, gacan ka gaysashada wax ka qabashada tayada hawada liidata, iyo wanaajinta natijjooyinka caafimaadka deegaanka.



Sawir: The Broadway,  
Greenford.

QAADO/SAMEEY  
SAHANKEENA

Giji halkaan ama iskaan ka  
qaad koodhka QR si aad noola  
wadaagto aragtidaada





**Sawir:** Xarunta Magaalada Hanwell, Wadada Uxbridge.



**Sawir:** Wanaajinta fursadaha shaqada.

## Qorshaha Magaalada Hanwell

Hanwell waxay ka kooban tahay hanti badan oo taariikhi ah oo ay ku jiraan Hanwell Community Center, Hermitage, iyo Kaniisadda St Mary. Bartamaha magaalada waxa ay bixisa adeegyo cunto, tafaariiq, iyo adeegyo kala duwan oo ka yimaada ganacsijo madax banaan iyo kuwo isku xiran. Waxaa jira dholaa-tusyo dukaameysi oo ku yaala Waddada Hoose ee Boston iyo adeegyada deegaanka iyo tafaariiqda ganacsiga ee Waddada Boston. Hanwell waxay bixisa meelo banaan oo qiimo leh sida Brent Lodge Park, iyo Churchfield's Ground Recreation.

Horumarka cusub waa in lagu jiheeyaa oo gacan looga gaystaa wanaajinta fursadaha safarka firfircoonda ee maxalliga ah sida socodka iyo baaskiil wadida si xaafadaha deegaanka ah u helaan gelitaanka wanaagsan ee bartamaha magaalada Hanwell, xarumaha maxalliga ah, iyo meelaha bannaan ee cagaaran.

### Waxa aad noogu sheegtay Sahanka Qaabeynta Ealing:

Dadka maxalliga ah ee Hanwell waxay ka walaacsan yihiin guryaha qimahooda la awoodi karo, sida aaggoodu isu beddelayo, tayada hawada, iyo tashiilaadka madadaalada oo magaaladooda ah. Si kastaba ha ahaatee, gaadiidka dadweynaha iyo isku xirka bulshada waxaa si aad ah u qiimeeyay dadka deegaanka.

## Aragtida/Hadafka Hanwell

### Shaqooyinka iyo Kobaca:

Kobaca waxa diiradda lagu saari doonaa wanaajinta goobaha caamka ah, iyadoo la bixinayo adeegyada tafaariiqda ganacsiga ee bartamaha magaalada iyo dib u soo nooleynta wadada sare ee maxalliga ah iyada oo loo marayo isticmaalka isku dhafan iyo horumarinta lagu jiheynayo dhaxalka, iyo dib u soo nooleynta dhaxalka ee hareeraha Grand Union Canal iyo agagaarka Wharncliffe Viaduct.

Waxaa jiri doona fursado abuuraya imaatinka Khadka Elizabeth si loo bixiyo guryo iyo shaqooyin cusub oo loogu talagalay dadka deegaanka. Istimcaalka dabciiga hadda jirta ee aagga waxay gacan ka geysan doontaa samatabbixinta horumarintaa iyo kor u qaadida hantida dhaxalka iyadoo goobo shaqo oo qiimahooda la awoodi karo laga bixinayo goobta warshadaha istiraatijiyadeed ee Trumpers Way iyada oo loo marayo hannaan uu hoggaamiyo qorshaha.

Waxa jira soo jeedinno ku aadan horumarinta degaanka ee Waddada Uxbridge, iyo xuddunta Boosteejada Hanwell iyo Isbitaalka Ealing iyo bixinta gurya qimaooda la awoodi karo sida gurya loogu talagalay iibsadayaasha ugu horeeya, dadka shaqeeyaa iyo guryaha gaarka ah ee la aqoonsaday.





**Sawir:** Isku xirka khadka Elizabeth ee Boostejada Tareenka ee Hanwell.



**Sawir:** Waddooyinka baaskiilka ee ag mara kanaalka Grand Union, Hanwell.

### Xarumaha magaalada:

Xarunta Degmada Hanwell waxaa loo dayactiri doonaa oo loo wanaajin doonaa sidii adeeg deegaan iyo xarun shaqo ahaan iyadoo la wanaajin doono lana balaarin doono adeegyada, shaqada, bakhaarada, guryaha, iyo hirgelinta horumarinta deegaanka.

Waxaa jiri doona fursado loogu talagalay horumarinta isticmaalka isku dhafan rr agagaarka Isbitaalka Ealing iyo goobta warshadaha ee ku dhow.

Xaafado 20-daqiiko ah ayaa laga hirgalin doonaa Hanwell halkaas oo dadka deegaanka ah ay ku dabooli karaan baahiyahooda maalinlaha ah meel 20-daqiiko oo socod ah u jirta guryahooda. Wawaana ku jira tas-hiilaadka wax iibsiga, nashaadaadka firaaqada, helitaanka dugsiyada, adeegyada caafimaadka deegaanka sida xarumaha GP-ga iyo goobaha shaqada ee ugu fiican.



**HORUMARINTU WAA  
IN AY ISKU DHAFTAA  
AWOODAHA JIRA IYO  
FURSADAHU CUSUB.**

### Gaadiidka:

Waxaa la hagaajin doonaa gaadiidka sida;

Xoojinta gaadiidka dadweynaha iyo waddooyinka firfircooni ee taga xarunta magaalada Greenford iyo maalgelinta safarka firfircooni ee waddooyinka sida Greenford Avenue.

Hirgelinta waddo cusub oo baaskiil wadid iyo socod loogu talagalay oo ka imanaya Trumpers Way Industrial Estate oo tagaya ilaa Greenford iyo Perivale iyadoo la sii marayo Brent Valley Park iyo goobaheeda dadweynaha ee la isticmaali karo.

Ku-daridda waddooyinka soo jiidashada leh ee cagaarka iyo shabakada kanaalka iyo iyada oo loo sii marayo Hanwell gudaha shabakadda ballaaran ee lugeynta iyo ballaarinta waddada jiida ee Grand Union Canal.

**QAADO/SAMEEY  
SAHANKEENA**

*Giji halkaan ama iskaan ka  
qaad koodhka QR si aad noola  
wadaagto aragtidaada*





**Sawir:** Northala Fields,  
Northolt.

## Qorshaha Magaalada Northolt

Northolt waa magaala ku nool dad kala duwan waxayna hoy u tahay dad dhaqamo kala duwan leh, si kastaba ha ahaatee maalgashi la'aan ayaa ka qayb qaadatay in Northolt ay noqoto mid ka mid ah aagaga ugu go'an ee degmada.

Northolt waxay inta badan ka kooban tahay degaan la dhisay kadib dagaaladii iyo meelo banaan oo leh xaafado galbeed ka xiga magaaladu waxay heli kartaa dhul banaan oo cagaaran ah. Waxaa sidoo kale jira Aagga Ilaalinta Cagaarka Xaafadda ee Northolt kaas oo hoy u ah dhismayaal badan oo ay ku jirto Kaniisadda St Mary.

Boostejada dhulka hoostiisa ee Northolt iyo Boostejada Jardiinada Northolt (tareenada qaranka) labaduba waxay bixiyaan isku xirka bartamaha London, si kastaba ha ahaatee, xaafadaha koonfurta A40 waxay leeyihiin heerar hooseeya oo helitaanka gaadiidka dadweynaha ah. Grand Union Canal waxa uu bixiyaa isku xirka baaskiilada ee demada intaada kale ah, laakiin guud ahaan wadooyinka safarka ee firfircoo ayaa loo baahan yahay in la hagaajiyo.

Kobac ayaa looga baahan yahay Northolt, kaas oo lagu qaabayn karo mabaadii'da 'xaafad magaalo beereed' si magaaladu u noqoto xaafad casri ah oo waarta oo leh dhaqaale cusub oo firfircoo oo ay taageerayaan guryo cusub.



## Waxa aad noogu sheegtay Sahanka Qaabeynta Ealing:

Dadka maxalliga ah ee Northolt waxay ka walaacsan yihiin guryaha qimahooda la awoodi karo, sida aaggoodu isu beddelayo, tirada dukaamada iyo tashiilaadka madadaalada iyo sida ay badbaado ugu dareemayaan magaaladooda. Si kastaba ha ahaatee, gaadiidka dadweynaha iyo isku xirka bulshada waxaa si aad ah u qiimeeyay dadka deegaanka.

## Aragtida/Hadafka Northolt

### Shaqooyinka iyo Kobaca:

Kobacu wuxuu taageeri doonaa bixinta fursadaha shaqo oo la wanaajiyey, qaab nololeed caafimaad leh iyo deegaan tayo wanaagsan leh. Isku xirka aagagga la dega ee ku hareeraysan iyo meelaha cagaaran, iyo dhaqdhaqaqa ganacsiga ee Waddada Kaniisadda iyo Waddada Mandeville ayaa la horumarin doonaa.

Maalgashiga meelahan ayaa la samayn doonaa si looga taageero wax ka qabashada caafimaadka iyada oo loo marayo dhisitaanka kaabayaal bulsho oo cusub iyo helitaanka adeegyo.

Horumarinta isticmaalka warshadaha iyo ganacsiga, sii kordhinta dhismooyinka aagga warshadaha ee Northolt (oo leh takhasusyo xagga wax soo saarka, jumlada, gaadiidka, iyo kaydinta ah) iyo isku xirka wanaagsan ee A40 waxay abuuri doontaa shaqooyin cusub. Tani waxay taageeri doontaa bilawga ganacsiyada cusub iyo meelo ku haboon oo qimahooda la awoodi karo waxayna xoojin doontaa xiriirka ay magaaladu la leedahay Greenford iyo Perivale.

Istaydyada Medlar Farm, Yeading Lane, Racecourse, Grange Court, Willow Tree, iyo Islip Manor waa la kobcin doonaa iyadoo loo samaynayo fursado goobo dadwayne oo tayo sare leh, horumarinta gelitaanka iyo bixinta kaabayaal.

### Xarumaha magaalada:

Xarunta magaalada ee hadda jirta ee Northolt waa la ilaalin doonaa waana la wanaajin doonaa iyadoo loo samaynayo horumarin cusub oo la isku dhafan oo ay ku jiraan guriyeenta, tafaariiqda, adeegyada, iyo xarun cusub oo basaska loogu talagalay oo Qayb ka ah qorshaha cusub, kaas oo sidoo kale ujeedadiisu tahay in la horumariyo bixinta adeegyada bulshada iyo madadaalada.

Xarun cusub oo xaafadda White Hart ah ayaa la aburi doonaa si loo dhamaystiro Xarunta Magaalada Northolt waxaana gacan laga geysan doonaa dib u soo kabashada aagga ballaaran iyadoo la siinayo horumarin iyo wanaajinta isku xirka labada aag ee dhinacyada kala duwan ee wareegga wadada. Xaruntan cusub waxa ay aagga ku soo kordhin doontaa booteejjooin gaadiid dadweyne oo wanagsan, dukaamo badan, adeegyo iyo shaqo, tashiilaad badan oo bulshada iyo madadaalo loogu talagalay iyo horumarinta goobaha dadweynaha.

Xaafado 20-daqiilo ah ayaa laga hirgalin doonaa Northolt halkaas oo dadka deegaanka ah ay ku dabooli karaan baahiyahooda maalinlaha ah meal 20-daqiilo oo socod ah u jirta guryahooda. Wixaana ku jira tas-hiilaadka wax iibsiga, nashaadaadka firaaqada, helitaanka dugsiyada, adeegyada caafimaadka deegaanka sida xarumaha GP-ga iyo goobaha shaqada ee ugu fiican.

### Gaadiidka:

Waxaa la hagaajin doonaa gaadiidka sida;

Wanaajinta waddooyinka socodka iyo baaskiilka ee hadda jira ee ku xiraya xarumaha gaadiidka dadweynaha sida boosteejada Northolt ee dhulka hoostiisa ah, isku xirka meelaha kala duwan ee Northolt, iyo isku xirka boosteejada ugu dhow ee Elizabeth Line.

Soo kordhinta tillabooyinka si magaalada iyo xarumaha xaafadda loogu xiro/xiriiriyo meelaha bannaan ee cagaaran ee u dhow. Hagaajinta helitaanka, jid-raadinta iyo calaamadaynta meelaha cagaaran ee furan ee u dhow Northolt Town center.

### Caafimaadka & Kaabayaasha:

Horumarintayaa lagu samayn doonaa waddooyinka cagaarka ah ee hadda jira si loo bixiyo 'wareegga cagaaran' ee waddooyinka dadka lugneynaya iyo baaskiayda, oo dariiqa ku dheggen kanaalka Grand Union wuxuu noqon doonaa waddo caan ah oo ay isticmaalaan dadka maxalliga ah. Waxaa jiri doona tillabooyin lagu ilaalinayo kala duwanaanshaha noolayaasha deegaanka, yaraynta fatahaada bijaha xilliga dabaylaho iyo wanaajinta tayada hawada iyo bixinta goobo bulsho.





**Sawir:** Dhismaha Hoover waxaa dib loogu dhisay dukaanka weyn ee Tesco.



## Qorshaha Magaalada Perivale

Perivale waxay ku taalaa waqooyiga degmada, waxay horumartay nuskii hore ee qarnigii 20aad, iyada oo wax soo saarka warshadaha ay tahay darawalka ugu weyn ee maalgashiga guryaha ee Western Avenue, isku xirka Perivale iyo London. Perivale maanta waxay leedahay dabci xaafadeed. Magaaladu waxay aragtay heerar horumarineed oo dhexdhexaad ah tobanaankii sano ee la soo dhaafay, waxayna ka faa'iidaystataa goobo cagaaran oo badan sida Perivale Park, Perivale Wetlands, iyo Grand Union Canal.

Perivale waxay leedahay hanti bulsho iyo madadaalo oo qiimo leh sida Perivale Hive iyo Perivale Community Center. Waxaa jira dhoola-tusyo dukaameysi oo ku yaala Bilton Road iyo Medway Parade kuwaas oo bixiya xulashooyin cunto iyo wax iibsi oo xaddidan, dadka deegaanka waxay inta badan u safraan meelaha kale ee degmada sida Greenford Broadway si ay uga soo dukaameystaan.

Maanta Perivale waxay leedahay dhul warshadeed oo aad u sarreeya oo shaqooyin ballaaran u abuuraya aagga, waxaana jirta fursad lagu xoojinayo dhulka warshadaha taasoo sii abuuraysa shaqooyin cusub oo kala duwan.

Dad badan oo deegaanka ah ayaa isticmaala boosteejada dhulka hoostiisa marta si ay u aadaan bartamaha London; Perivale waxay la ildaran tahay jaamka baabuurta iyo isku xirka wadooyinka oo kala go'ay sababo la xiriira A40 iyo dhaqdhaqaqaqa warshadaha.

Dadka maxalliga ah ee Perivale waxay ka walaacsan yihiin guryaha qiimahooda la awoodi karo, sida aaggoodu isu beddelayo, wadooyinka socodka iyo baaskiil wadidaa, iyo fursado shaqo. Si kastaba ha ahaatee, gaadiidka dadweynaha iyo isku xirka bulshada waxaa si aad ah u qiimeeyay dadka deegaanka.

### Waxa aad noogu sheegtay Sahanka

#### Qaabeynta Ealing:


Dadka maxalliga ah ee Perivale waxay ka walaacsan yihiin guryaha qiimahooda la awoodi karo, sida aaggoodu isu beddelayo, dareemida badbaado, wadooyinka socodka iyo baaskiil wadidaa, iyo fursado shaqo. Si kastaba ha ahaatee, gaadiidka dadweynaha iyo isku xirka bulshada waxaa si aad ah u qiimeeyay dadka deegaanka.

### Aragtida/Hadafka Perivale

#### Shaqooyinka iyo Kobaca:

Kobacu wuxuu sii xooji doonaa kala duwanaanshaha badan xulashooyinka tafaariiqda, deegaanka, bulshada, iyo madadaalada ee magaalada wuxuuna u oggolaanayaa wanaajinta helitaanka meelaha bannaan ee cagaaran, wadooyin la wanaajiyey iyo fursadaha wax lagaga qabanayo tayada hawada liidata iyo saamaynta deegaanka ee ay sababeen dhaqdhaqaqaqyada warshadaha.





**Sawir:** Xarunta  
warshadaha ee Perivale.



Aqoonsiga dhaqaale ee magaalooyinka oo ah mid si fiican isku xiran xarun warshadeed ahaan ayaa la horumarin doonaa si loo wanaajiyo isku xirka magaalooyinka deriska la ah, taas oo soo kordhin doonta tiro wanaagsan oo ah fursado shaqo iyo goobo shaqo oo qiimahooda la awoodi karo oo loogu talagalay ganacsatada yaryar iyo ganacsiyada cusub.

#### Gaadiidka:

Waxaa la hagaajin doonaa gaadiidka sida;

Wax ka qabadka arrimaha ay keeneen A40 iyo ilaalinta ku socoshada iyo baaskiil ku wadida agagaarka guryaha warshadaha.

Wanaajinta isku xirka gaadiidka dadweynaha, isgoysyada wadooyinka iyo abuurista iyo kor u qaadida wadooyinka safarka ee firfircoona sida marinka Perivale Park ee galbeedka ilaa bartamaha magaalada Greenford, koonfurta ilaa Trumpers Lane, Guryaha Warshadaha ee Hanwell, iyo aggagaarka Grand Union Canal iyo A40.

Maamulka taraafikada ayaa lagu dabaqi doonaa wadooyinka ku badan jaamka baabuurga si loo hormariyo baaskiil wadida iyo socodka.



**WAXAA JIRTA BAAHI IYO FURSAD AH  
IN LA HORMARIYO WADDOOYINKA  
SAFARKA FIRFIRCOON EE LAGU  
AADAYO MEELAHA BANNAAN EE  
CAGAARAN EE DHOW.**

---

#### Xarumaha Magaalada:

Xarunta xaafadda ee hadda jirta ee Perivale (Bilton Road) iyo xarunta deegaanka ee Medway Parade ayaa la horumarin doonaa si loo daboolo baahiyaha maalinlaha ah ee dadka deegaanka iyadoo la kordhinayo gaadiid dadweyne oo wanaagsan iyo ballaartinta adeegyada kala duwan ee la heli karo.

Xarun cusub oo maxallii ah oo ku taala Horsenden Lane South ayaa la dalacsiin doonaa si loo daboolo baahiyaha dadka deegaanka loona wanaajiyo tayada fagaarayaasha dadweynaha iyo waddooyinka firfircoona ee safarka.

Xaafado 20-daqiiko ah ayaa laga hirgalin doonaa Perivale halkaas oo dadka deegaanka ah ay ku dabooli karaan baahiyahooda maalinlaha ah meel 20-daqiiko oo socod ah u jirta guryahooda. Wawaana ku jira tas-hiilaadka wax iibsiga, nashaadaadka firaaqada, helitaanka dugsiyada, adeegyada caafimaadka deegaanka sida xarumaha GP-ga iyo goobaha shaqada ee ugu fiican.

**QAADO/SAMEEY  
SAHANKEENA**

Giji halkaan ama iskaan ka  
qaad koodhka QR si aad noola  
wadaagto aragtidaada





**WAA MUHIIM IN LA  
WANAAJIYO KALA DUWAN EE  
TAFAARIIQDA IYO ADEEGYADA  
KALE EE MAALINTII IYO  
HABEENKII.**



Sawir: South Road, Southall.

## Qorshaha Magaalada Southall

Southall waa mid ka mid ah meelaha kala duwan ee Boqortooyada Midowday iyadoo 86% dadka Southall loo aqoonsan yahay dad aan ahayn caddaan. Southall waxa ay ka kooban tahay laba xarumood oo waaweyn, mida ugu horreeysa waa Southall Town Center oo bixisa cuntooyin, tafaariiqle, dukaamo faashiyoon kala duwan, mida labaadna waa Xarunta Xaafadda King Street oo bixisa alaaboo u badan kuwa fudud.

Aagga warshadaha Southall waxay hoy u tahay ku dhawaad 400 oo meherado, kuwaas oo bixiya 4,000 shaqooyin. Meheraduhu waxay ku baahsan yihiin gudaha Goobta Istaratijiyadeed ee Great Western, iyadoo leh dhawr kooxood oo ganacsiyo yaryar oo ay ku jiraan Ganacsiga Caalamiga ah, Featherstone, iyo dhismayaasha warshadaha ee Bridge Road.

### Waxa aad noogu sheegtay Sahanka Qaabeynta Ealing:

Dadka maxalliga ahi waxay ka walaacsan yihiin guryaha qiimahooda la awoodi karo, dareemida badbaadado, waddooyinka socodka iyo baaskiilka, tayada hawada, nadaafadda iyo badbaadada jardiinooyinka iyo meelaha bannaan iyo jiritaan la'aanta fursado shaqo oo wanaagsan. Si kastaba ha ahaatee, gaadiidka dadweynaha iyo isku xirka bulshada waxaa si aad ah u qiimeeyay dadka deegaanka.

### Aragtida/Hadafka Southall

Southall waxa ay maraysaa horumar iyo maalgashi is bedel degdeg ah ku socda. Southall ayaa door muhiim ah ciyaaraysa maadaama ay tahay meal qaranka

muhiimad u leh, waxaana ka jira walaac maxalli ah oo ku aadan miisaanka iyo xawliga horumarka dhawaan laga sameeyey. Qorshaha deegaanku waxa uu door muhiim ah ka ciyaari doonaa xaqijinta in horumar kasta oo mustaqbalka la sameeya uu noqdo mid lagu jiheynayo fursadaha shaqo iyo lagana dhigo mid dhexdhedaad ah miisaan ahaan.

### Shaqooyinka iyo Kobaca:

Kobaca cusubi waxa uu soo bandhigayaa fursad wax lagaga qabanayo hoos u dhaca, mushahar yarida, iyo caafimaad darrada. Maalgashigu wuxuu keenayaa fursado shaqo, guryo qiimahooda la awoodi karo oo ay ku jiraan guryo cusub oo si wanaagsan loo nashqadeeyey si loo fududeeyo nolosha jiilasha kala duwan iyo buuxinta baahiyaha guriyeenta ee gaarka ah, taageerista qaab nololeed caafimaad leh, wadooyin cagaaran oo badan, iyo gaaritaanka/helitaanka deegaan tayo wanaagsan leh.

Kobaca waxa diirada lagu saari doonaa agagaarka: Boosteejada Southall, Galbeedka Southall (Aagga Cagaaran ee Southall) iyo East Southall (Xarunta Ganacsiga Middlesex iyo Goobaha Monster Honey) iyada oo loo marayo nidaamyada isticmaalka isku dhafan, goobo badan oo cagaaran iyo dadweyne iyo isku xirkal ahaan. Waaqooyinka iyo Kobaca:


Aagga Warshadaha ee Southall (oo leh takhasusyo ku aadan jumlada, bakhaarka, saadka, iyo gaadiidka) ayaa la ilaalin doonaa, la taageeri doonaa lana kobcin doonaa iyadoo loo abuurayo goobo shaqo oo kala duwan, guryo qiimahooda la awoodi karo, iyo goobo shaqo oo la maareeyo oo loogu talagalay ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexdhedaadka ah iyo, hadba halkii ay ku habboon tahaay, xoojinta isticmaalka isku dhafan oo ay ka mid tahay guryo cusub.



Xarunta Xirfadaha Cagaaran ee Kulliyada Galbeedka London waxay gacan ka geysan doontaa abuurista shaqooyin waxaana la samayn doonaa Qorshe Dhaqaale oo Loo Wada Dhan Yahay yahay si looga jawaab celiyo xaaladaha faqriga iyo saboolnimada. Fursadda ah in xarunta istuudiyaha filimada laga aasaaso Southall ayaa sidoo kale lala sahmin doonaa daneeyayaasha.

Waxaan xaqijjin doonaa in horumarka cusub uu buuxiyo heerarka naqshadeynta ee ugu sarreya isla markaana si togan looga jawaab celiyo dabciga deegaanka. Wuxaan ku dabaqi doonaa tillaabooyn si loo sugo dayactirka mustaqbalka, dib-u-isticmaalka, iyo badbaadada mustaqbalka fog ee hantida dhaxalka oo ay ku jiraan Aagga Ilaalinta Cagaaran ee Norwood iyo Norwood Hall, in horumarin lagu sameeyo dhulka dadweynaha ee ku teedsan kanaalka Grand Union.

Guryo si dhab ah u qiima jaban ayaa la bixin doonaa, gaar ahaan aaggaga Norwood Green, Southall Broadway, iyo Southall Green. Dib-u-kobcinta mustaqbalka ee Istaydka Golf Links iyo Istaydka Havelock Estate waxay dhiirigelin doontaa kaabayaal cusub oo bulsheed iyo bakhaaro alaabeed oo ku habboon.



Sawir: King Street, Southall.

**QAADO/SAMEEY  
SAHANKEENA**

Giji halkaan ama iskaan ka  
qaad koodhka QR si aad noola  
wadaagto aragtidaada

A yellow rectangular card with the text "QAADO/SAMEEY SAHANKEENA" at the top. Below it is a line of smaller text: "Giji halkaan ama iskaan ka qaad koodhka QR si aad noola wadaagto aragtidaada". To the right of this text is a QR code. At the bottom left is a small icon of three stylized human figures.



### Xarumaha Magaalada:

Bartamaha magaalada Southall waa la wanaajin doonaa si ay u bixiso tafaariiqda, ganacsiga, madadaalada iyo isticmaalka bulshada. Waxaa jiri doona soo-jeedin lagu wanaajinayo goobaha dadweynaha ee ku xeeran aagga iyo in la helo isku xirnaan wanaagsan ee goobaha horumarinta iyo magaalooinka deriska la ah, iyo sidoo kale taageerada adeegyada xilliyada ka baxsan saacadaha shaqada.

Xarunta xaafada King Street (West Southall) waxay kaabi doontaa xarunta Southall iyada oo la horumarinayo dukaamo badan, loo samaynayo isticmaalo cusub, isticmaal shaqo, goobo dadweyne iyo jidatka lugaynta.

Horumarinta aagga Southall Green Quarter waa la sii wadi doonaa muddada qorshaha iyada oo hagaajin lagu samayn doono gaadiidka dadweynaha iyo safarka firfircooni, goobaha dadweynaha, goobaha cagaaran iyo meelaha bannaan. Horumarinta kaabayaasha bulshada waxaa ka mid ah samaynta dugsi hoose oo cusub, dhismayaal bulsheed, xarun caafimaad iyo guryo dhab ah oo qimahooda la awoodi karo iyo noocyada kale ee guryaha si loo daboolo baahiyaha deegaanka.

Goobihiiin ganacsi ee hore ee Honey Monster iyo Middlesex waxay ku bixin doonaan horumarinta isticmaalka isku dhafan ee guryaha, iyo shaqada, tiro ka mid ah cabbirro guryeed si ay u taageeraan Baahida dadka deegaanka ee badan oo ay ku jiraan ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka ah, tafaariiqda, isticmaalka madadaalada ee bulshada iyo kanaalka. Dhismaha Raadiyaha Sunrise waa la hayn doonaa waana la horumarin doonaa.

Hagaajin ayaa lagu samayn doonaa meelaha caamka ah ee dadweynaha si loo xoojiyo xiriirkha ka dhexeeyaa Dormers Wells, Lady Margaret iyo Xarunta Magaalada Greenford.

Xaafado 20-daqiiko ah ayaa laga hirgalin doonaa Southall halkaas oo dadka deegaanka ah ay ku dabooli karaan baahiyahooda maalinlaha ah meal 20-daqiiko oo socod ah u jirta guryahooda. Wuxaan ku jira tas-hiilaadka wax iibsiga, nashaadaadka firaaqada, helitaanka dugsiyada, adeegyada caafimaadka deegaanka sida xarumaha GP-ga iyo goobaha shaqada ee ugu fiican.

### Gaadiidka:

Waxaa la hagaajin doonaa gaadiidka sida;

Waddooyin baaskiil wadis oo wanaagsan oo badbaado leh sida marinka ka baxaya Waddada Lady Margaret gaaraya ilaa Grand Union Canal iyo hareeraha Waddada Uxbridge. Wuxaan sidoo kale kala shaqeyn doonaa daneeyayaasha in la abuuro shabakado safareed oo firfircooni oo tayo sare leh iyo hagaajinta isku xirkha gaadiidka dadweynaha ee 24-saac ah ee garoonka Heathrow.

Bixinta dariiq ay isticmaalaan gaadiidka dadweynaha iyo safarada firfircooni ee lagu xiro Havelock Estate ilaa Merrick Road. Wanaajinta tallaabooyinka safarka firfircooni, waddooyinka jiidista kanaalka iyo wanaajinta meelaha dadweynaha ee u dhexeeyaa Waddada Merrick iyo Grand Union Canal.

### Caafimaadka & kaabayaasha:

Horumarinta caafimaadka iyo kaabayaasha ayaa la samayn doonaa sida:

Bixinta goobo banaan oo cagaaran oo badan oo xagga galbeedka iyo koonfurta Southall ah, iyada oo la abuurayo geedo lana raadinayo habab lagu kordhiyo badbaadada.

Wanaajinta marinada socodka iyo baaskiilkha iyo calaamadaynta Dooxada Brent iyo Grand Union Canal.

Wanaajinta helitaanka xarumaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ee xarumaha caafimaadka Jubilee Gardens iyo Lady Margaret Road iyo raadinta fursado boos loogu abuuri karo xarumaha caafimaadka iyo adeegyada kale xilliga la samaynayo horumarada cusub, iyo sidoo kale mashaariicda dib u habeynta ee laga fulinayo gudaha Koonfur-Bari Southall.

Aqoonsashada in dadka deegaankeenay ay qiimeeyaa kaabayaasha bulshada sidaas darteedna la wanaajiyoo lana cusboonaysiyo tas-hiilaadka bulshada ee hadda jira iyo in la aqoonsado fursadaha kaabayaasha bulshada ee cusub.



## Qaado/sameey sahankeena gaaban!

Waxaan linki dhix gelinay sahanka gaaban dhamaadka qorshe magaaleed kasta laakiin ha ka welwelin haddii aad seegtay!

Guji halkaan ama iskaan ka qaad koodhka QR si aad u hesho dokumentiga buuxa ee ay ku jiraan siyaasadaha.



Nagala soco dhammaan kanaalada warbaahinta bulshada oo booqo websaydkeena si aad wax badan uga ogato Wadatashiga Xeerka Golaha Ealing 18.

